

# 7 shay oo ay tahay inaad ka ogaato talaalka COVID-19



## Macluumaadka lambar 1 Talaalka COVID-19 lagama qaado COVID-19.

Talaalada COVID-19 malaha fayras nool, markaa ma keeno COVID-19. Talaallada COVID-19 waxa uu kaa ilaalinayaa fayraska. Waxa aad dareemi doontaa saamayn caafimaad daro ah marka lagu talaalo, sida gacanta oo ku bararta ama xumad. Kuwani waa caadi oo waa caan.



## Macluumaadka lambar 2 Talaalka COVID-19 waa amaan, xataa iyada oo si dhakhso ah loo sameeyay.

Ma jirto talaabooyin laga booday markii la samaynayay talaalada COVID-19. Saynisyahanadu caalamka oo dhan ayaa ka shaqaynayay teknooloojiyada wax ka badan toban sano. Waxaana weeye sababta keentay in la sameeyo talaal amaan ah oo wax ku ool ah si dhakhso ah.



## Macluumaadka lambar 3 Talaalka COVID-19 waxa uu kaa ilaalin karaa wax ka badan hal nooc oo fayras ah.

Fayraska uu is badalayaa, ama waxoogaa ayuu qaab kale noqdaa, mudo kadib. Macluumaadka laga hayo talaalka COVID-19 waxa uu sheegayaa in uu wax ka qabto ilaa iminka noocyada la arkay ee fayrasyada keena ah COVID-19.



## Macluumaad lambar 4 Talaalada COVID-19 ma badalayaan DNA-gaaga.

Talaalada COVID-19 waxaa weeye talaalada mRNA oo ma dhax galo sinaba DNA-ga. Waxa ay keentay jawaabcelin difaaca jidhka ah oo abuurta antibodhi si looga ilaaliyo qofku inuu qaado COVID-19.



## Macluumaadka lambar 5 Talaalada COVID-19 weli lalama xidhiidhin wax dhafaan ama ilmaha oo soo dhaca.

COVID-19 ma keeno inay dumarku dhali waayaan siiba dumarka qaaday fayraska, markaa ma jirto wax sabab ah oo la isku odhan karo in talaalku keeno. Waxaa jira macluumaad ku faafay onleyinka oo aan **run ahayn**; kaas oo sheegaya in borootiinta ku jirta fayrasku ay weerarka borootiinka ku jirta madheerta. **Maaha run taasi.** Waxyar oo kamid ah amino aysiidha ku jira labada booratiin ma keenaan wax saamayn ah. Talaalka COVID-19 laguma tijaabin dumarka uurka leh, laakiin dumarka uurka leh waa laga talaali karaa xanuunada inta ay uurka leeyihiin. Dumarka uurka leh waxa kordha khatarta xanuunka daran ee ay ka qaadi karaan COVID-19 oo waxaa jira fursad COVID-19 uu ku qaadi karo ilmuhu marka uu dhalanayo. Kala hadal dhakhtarkaaga si aad u eegto hadii ay tahay inaad is talaasho.



## Macluumaadka lambar 6 Talaalada COVID-19 ma wataan mikroojib ama aalad dadka meesha ay joogaan lagula socdo.

Macluumaadka ku saabsan talaalku COVID-19 inuu wato mikroojib ama aalad dadka lagu socdaa **waa been cad**. Waanu garanaynaa waxa ku jira talaal kasta. Liiska waxyaabaha uu ka samaysan yahay talaal kasta waxaa laga heli karaa [onleyinka](#).



## Macluumaadka lambar 7 Dadka qaba xanuunada mudada dheer ah ama xaaladaha waa inay is talaalaan si dhakhso ah marka la gaadho wakhtigii la talaali lahaa.

Hadii aad qabto xanuun mudo dheer ah, sida macaanka, waxa aad khatar badan ugu jirtaa inaad qaado xanuun daran oo COVID-19 ah. Talaalada COVID-19 waa amaan oo wax ayay u taraan dadka qaba xanuunada mudada dheer ah.